**Sharciga 31 Jannaayo 1961. lamba. 5**

**Arrinta Midoobidda (Soomaaliya iyo Somaliland)**

**MADAXWEYNAHA KU-MEELGAARKA EE JAMHUURIYADDA**

**Marka uu arkay meelmarinta Golaha Xeer-dejinta Qaranka;**

**WUXUU ANSIXINAYAA**

Xeerka soo socda:

**Qod. 1**
**Israaca iyo Caasimadda**

1. — Somaliland iyo Soomaaliya oo wada jira waxay dhiseen sida uu qabo Dastuurka, Jamhuuriyadda Soomaaliya oo xora, demoqaraadi iyo midaysan;
2. — Caasimadda Jamhuuriyaddu waa Muqdisho.

**Qod. 2**
**Golaha Qaranka**

Golayaasha Xeer-dejinta Somalilanda iyo Soomaaliya waxay noqonayaan iyagoo wada jira Golaha Xeer-dejinta Qaranka Soomaaliya ee ugu horreeyay ee Jamhuuriyadda.

**Qod. 3**
**Sii-jiritaanka Xeerarka iyo Hay'adaha**

1. — Xeerarkii ka jiray dalkii Somaliland iyo Soomaaliya tariikhda Israaca waxy ka sii kala jirayan midkasta aaggiisa si waafqsan xeerka Dastuurka, xeerkaan iyo xeer kasta ee ku soo xiga;
2. — Si waafaqsan qod. 94 ee Dastuurka ee ku saabsan walaayadda Maxkamadda Sare, iyo wixii xeer kasta ee ku soo xiga, Maxkamadaha sida ay hadda uga dhisanyihiin Somaliland iyo Soomaaliya waxay sii wadanayaan in ay ku sii shaqeeyaan walaayaddooda;
3. — Haddii aan si kale Dastuurku u sheegin, xeerkaan iyo xeerarka lale ee ku soo xiga, dhammaan hay'adaha dawladda, ha ahaadeen kuwa dhexe ama kuwa daafaha, waxay ka sii shaqeynayaan oo sii haysanayaan dhammaan xilalkoodi iyo awoodahoodi ay lahaayeen;
4. — Si waafaqsan xeer kasta oo lasoo wado, xaaladda sharci iyo dhaqaale ee saraakiisha iyo karaaniyeyasha dawladda iyo wakaaladaha dawladda lagama dhigi karo wax ka hooseeye intii ay qaadanayeen Midowga ka hor;
5. — Xaq kasta iyo waajib, ha ahaado mid guud ama mid gaar ahaaneed, sidiisi ayuu u sii jirayaa sida ay qabaan xeerarka nidaaminaya iyado si buuxda loo aqoonsanayo saxnaanta raad kasta oo sharcigu leeyahay.

**Qod. 4**
**Dhaxalka Xuquuqda iyo Waajibaadka**

1. — Xaq kasta oo si sharci aha lagu kasbaday iyo waajib kasta oo si sharci ah Xukuumadihii gobanimada hantiya ee Somaliland iyo Soomaaliya ay qaadeen iyo cid kasta oo iyagoo ka wakiila ay qaaday waxaa la ictibarayaa in ay u soo waregtay oo aqbashay Jamhuuridda Soomaliya laga soo bilaabo taariikhda Israaca;
2. — Haddii xuquuqda iyo waajibadka lagu soo sheegay faqradda sare ay ka yimadeen

heshiisyo caalamiya, aqbalaaddooda xagga Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay ku xirantahay hoggaansanaanta qod. 67 ee Xeerka.

**Qod. 5**
**Muwaadinimada**

Qof kasta ee taariikhda Israaca haystay muwaadinimada Somaliland amse midda Soomaaliya wuxuu nqonayaa muwaadin Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Qod. 6**
**Ciidanka Xoogga iyo Boliiska**

1. — Somaliland Scouts iyo Esercito Nazionale Somalo waxay noqonayaan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya waxayna hoos tagayaan Wasaaradda Diffaaca;
2. — Ciidanki Boliiska Somaliland iyo kuwii Soomaaliya waxay noqonayaan Ciidanka Boliiska Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Qod. 7**
**Qodabada Maaliyadda**

Jamhuuriyadda Soomaaliya inta ay ka yeelanayso miisaniyadd qura qoondaynta miisaaniyadda Somaliland iyo tan Soomaaliya waa ay sii jirayaan intii suurtagala in ay ka sii shaqeeyaan dalalkoodi marka loo eego ulajeedddooyinki horay loogu jideeyay.

**Qod. 8**
**Xukunka Kastamada**

1. — Inta laga soo saarayo xeer cusub, badeecada dibadda laga soo dhoofiyo oo dhulka:
   a) Somaliland laga soo qaado lana keeno Soomaaliya iyo taas cagsigeeda waxaa lagu dhaqayaa xeerarka kastamada jiray markii Israacu uu dhacay. Sikastaba: tirada canshuurta kastanka dalka loo soo qaaday badeecadaha haddii ay la egtahay ama ay ka yartahay midda dalka badeecadu ka timid, wax canshuura lagama qaadayo;
   b) haddii arrintaas cagsigeeda tirada canshuurta kastanka dalka la soo galiyay ay ka sarreyso canshuurta dalka laga keenay badeecadda waxaa la bixinaya faraqa labada canshuur u dhexeeya keliya.
2. — Wax canshuur kastan ama canshuur kale lagama qaadayo dhaq-dhaqaaqa badeecadaha (oo ay ku jiraan xoolaha nool) ee u dhexeeya Somaliland iyo Soomaaliya iyo arrintaas cagsigeeda waxyaabaha ku saabsan soo dejinta iyo dhoofinta iyo dhaq-dhaqaaqa badeecadaha haddii badeecaduhu asal ahaan ay ka yimaadeen Somaliland kuna socdaan Soomaaliya iyo arrintaas cagsigeed, badeecadaha ay asal ahaan ka yimaadeen Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya;
3. — Illaa laga soo saarayo xeer cusub waxaa sidoodi u jiraya dhamman xeerarkii jiray taariikhda Israaca ee mid walba ka jiray Somaliland iyo Soomaaliya iyo arrintaas cagsigeeda.

**Qod. 9**
**Tirtiridda Xeerarka aan la jaan Qaadi Karin**

1. — Xeer kasta ee Somaliland iyo Soomaaliya oo uu ku jiro Dastuurka (The Somaliland Order in Concil, 1960, oo aan la jaan qaadi Karin Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo xeerkaan waa la tirtiray;
2. — Xeerarka "Israaca Somaliland iyo Somali Law" (lamba. 1 ee 1969) waa la baabi'iyay, marka laga reebo waxa ku saabsan qod.11, faqradda 4aad ee xeerkaas.

**Qod. 10**
**Cinwaanka iyo Dhaqangalka**

Xeerkaan oo loogu magac daray “ Axdiga Israaca” wuxuu dhaqangalayaa 1 Julay 1960. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxaana lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta waxaa ku waajiba in uu u hoggaansamo loona addeeco ka xeer Jamhiiryadeed.

Taariikhda Muqdisho, 31 Jannaayo 1969.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

**Aadan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Koobaad

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Wasiirka Arrimaha Gudaha

**Cabdirisaaq Xaaji Xuseen**